

Flexlinjen Västerås

Flexlinjen waa badalka basaska adeega dhaq dhaqaaqa basaska caasimada Västerås iyo adeega dhaq dhaqaaqa. Basaskani waxay ka orod yaryihiin basaska dawlada. Flexlinjen waxay kaa qaadi goobta flexpunkt(Istaanka baabuurta) ee kuugu dhaq waxayna kugu dajin flexpunkt ee aad go'aansatay in aad ku dagto.

Yaa ku socdaali kara Flexlinjen?

Hadii aad ka diwaangashantahay dawlada hoose ee Västerås, waxaad ku socdaali kartaa Flexlinjen hadii ay mid ka mid ah kuwan soo socda ku khuseeyaan:

- waxaad jirtaa 65 sano
- Waxaad haysataa ogolaanshaha isticmaalka adeega dhaq dhaqaaqa Västerås
- Waxaad heshaa faa'iidada xanuunka oo dhamaystiran

Waxaa kale oo lagu guddin karaa Flexlinjen hadii aad balansatay adeega qaadidka bukaanka ee maamulka gaadiidka socdaalka dadwaynaha

Sida la isugu diwaangaliyo Flexlinjen

Isu diwaangali **Flexlinjen adiga oo isticmaalaya foomka codsiga, kaas oo aad ka heli doonto** <http://www.ltv.se/Kollektivtrafik/flexlinjen-vasteras/> (luuqada Swedishka oo kaliya)

Si hadaba tan laguugu dhamaystiro sida ugu dhaqso badan, foomka ku buuxu koombiitarka oo u dir kollektivtrafikmyndigheten@ltv.se

Hadii wakaalada camiska bulshada ee Swedishku ku siisay faa'iidada xanuunka oo buuxda, waa in aad cadaynteeda ku soo lifaaqdaa codsigaaga.

Balanso socdaalkaaga

Waxaad ku sii balansankartaa socdaalkaaga taleefanka 0771-890 890 ama taleefanadayada adeega ee laga helikaro meelaha ay ka midka yihiin Isbitaalka ku yaala Västmanland ee Västerås, Ica Maxi Hälla, caasimada Coop Konsum and Coop Forum Stenby.

Flexlinjen waxxay shaqaysaa inta u dhaxaysa 09.00 iyo 17.00 Isniinta-Sabtida, marka laga reebo habeenka ciida masiixiga, maalita ciida masiixiga, maalinta feedhka, habeenka sanadka cusub, maalinta sanadka cusub, jimcaha wanaagsan, Axada Iisterka, Isniinta Iisterka, habeenka baadhtamaha xagaaga, maalinta badhtamaha xaagaaga. Socdaaladda maalmahan fadlan isticmaal taleefanada adeegbixintayada iyo kuwa caasimada kuwaas oo shaqeeya maalmaha fasaxa.

Faadlan u gudub boga xiga si aad u hesho xog dheeri ah

Fiican in aad ogaato

- Socdaal hal dhinac ah waxaa ku baxaysa SEK 20.
- Marka aad ku socdaassho Flexlinjen, waxaa laga yaabaa in ay jiraan dad badan oo u baahan inn laado ama la dajiyo ka hor inta aadan gaadhin meesha aad ku dagaysay. Tani waxay ka dhigantahay jidka aad marayso iyo wakhtiga uu qaadanayo labaduba way kaladuwanayaan.
- Xiliga aad balanta ku qabsatay in aad socdaalka gasho waxaa laga yaabaa in 60 daqiiqo uu dib u dhoco, taas oo u baahan in aad ka fikirto marka aad qorshaysanayso socdaalkaaga. Hadii aad dhiibtay taleefan lambarkaaga, waanu kula soo hadli 10-15 daqiiqo ka hor inta aan lagu qaadin.
- Flexlinjen ma qaado kursiga taayirada leh ee laydhka ku shaqeeya.